

Ogolaansho guud oo lagu daadacayo laguna bixinayo macluumaad

Gacaliye waalid/Xannaaneeye

Waa raadinayaa ogolaanshahaaga inaad ugu ogolaato dugsiga/Wasaaradda Waxbarashada inay daabacdo ama bixiso macluumaad ku saabsan ilmahaaga oo ujeedadiisu tahay la wadaagista isaga/iyada khibradiisa ardayda kale, iyadoo la wargelinayo dugsiga iyo bulshada balaaran wixii ku saabsan dugsiga iyo nashaadka ardayga iyo ka diiwaangelinta ardayga ka qaybgalkiisa mashruucyada qiimaha leh ama adeega bulshada ah.

Macluumaadkan waxaa laga yaabaa inuu ka mid noqdo magaca, da'da, fasalka iyo macluumaadka lagaga qaaday ilmahaaga dugsiga sida sawiro, cod iyo duubista muuqaalka ah ilmahaaga, ilmahaaga shaqadiisa iyo ka hadlida fikratiisa sida isgaarsiinta isdhexgalka leh.

Isgaarsiinta laga yaabo in lagu daabaco macluumaadka ilmahaaga ama la bixiyo waxaa ku jira laakiinse aan ku koobnayn:

- Website-dada Dadweynaha ee Wasaaradda Waxbarashada oo ay ku jiraan website ka dugsiga, Intranet ka Wasaaradda Waxbarashada (shaqaalaha kaliya), baraha wax lagu qoro ee blogs iyo wikis
- Daabacaadaha Wasaaradda Waxbarashada oo uu ku jiro wargeyska dugsiga, magaasiinka dugsiga ee sannadlaha ah iyo warbixinta dugsiga, qalabka xayeysiinta ee la daabaco isagoo qoraal ah iyo elektarooniga ay ku jiraan website-dada Wasaaradda
- Akownada isgaarsiinta bulshada dugsiga iyo Wasaaradda ee rasmiga ah ee shabakadaha sida YouTube, Facebook iyo Twitter
- Joornaalada iyo wargeysyada magaala weynta iyo xaafadaba iyo qaybaha kale ee isgaarsiinta.

Waalidiintu waa inay ka warqabaan in marka macluumaad lagu daabaco website-yada dadweynaha iyo janalada warbaahinta bulshada, waxaa dib looga heli karaa online ahaan tiro sannado ah, haddii uusan ba ahayn wax joogta loo heli karo. Mareegaha wax laga baaro ayaa sidoo kale laga yaabaa inay kaydiyaan ama hayaan nuqulada macluumaadka la daabacay. Macluumaadka la daabacay wuxuu sidoo kale ku xirnaan karaa dhinacyo saddexaad.

Fadlan buuxi foomka ogolaanshaha oo dib ugu soo celi dugsiga taariikhda soo socota:

Date for return of permission form

Caawimaada turjubaanka

Haddii aad jecleen lahayd macluumaad intaa ka sii badan fadlan la xiriir dugsiga.

Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjumaan si aad dugsiga ula xiriirto, fadlan wac 131 450, u sheeg xiriiriyaha luuqadaad u baahan tahay oo weydii inay dugsiga wacaan. Xiriiriyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.

Mahadsanid

Magaca maamulaha (Name of principal)

Magaca dugsiga (Name of school)

Ka raali ahaanshaha daabacaada inay ogolaadaan waalidka/xannaaneeyaha

Parent/carer permission to publish consent

Waxaan akhriyey ogolaanshahan in la daabaco laguna:

(Calaamadeeyo hal sanduuq kaliya ugana tag kan kale sidiisa)

Waxaan siiyey ogolaansho dugsiga/Wasaaradda Waxbarashada si loo daabaco macluumaad ku saabsan ilmahayga sida kor lagu sharxay, oo ay ku jiraan isgaarsiinaha ay dadweynuhu isticmaalaan.

I give permission to the school/Department of Education to publish information about my child as described above, including in publicly accessible communications.

Ma siinayo ogolaansho dugsiga/Wasaaradda Waxbarashada inay daabacdo macluumaad ku saabsan ilmahayga sida kor lagu sharxay, oo ay ku jiraan isgaarsiinaha dadweynuhu isticmaalaan.

I do not give permission to the school/Department of Education to publish information about my child as described above, including in publicly accessible communications.

Ogolaanshahan saxiixan wuxuu ahaanayaa mid shaqeeya ilaa aan dugsiga u sheego wax kale.

Magaca ilmaha (fadlan daabac)

Name of child

Magaca xannaaneeyaha/waalidka
(fadlan daabac)

Name of parent/carer

Saxiixa xannaaneeyaha/waalidka

Signature of parent/carer

Taariikh

Date